



# Brashada la xiriirka: Waqtiga go'an ee Horumarka koritaanka Caadiga ah

(Learning to Communicate: A Timeline for Typical Development — Somali version)

Waalidka waa in uu fahmaa kuwan hoos ku qoran in ey yihiin hogaamin ah talaabooyinka horumarka xiriirka ilamhu maro markuu korayo. Ilmahu waa kala koriin duwan yihiin.

## Ilmaha markey jirsadaan 3 bilood, inta badan waxey awoodaan:

- iney ciyaan, haddaaqaan, ooyaan si ey u xiriiraan. Waalidka iyo cidda daryeesha ilmaha waa fasiran karaan waxey dhawaaqaa ula jeedaan
- iney u dhug yeeshaan hadalka cidda xannaaneysa
- iney u dhug yeeshaan naaska hooyada ama dhalada caanaha

## Ilmaha markey jirsadaan 6 bilood, inta badan waxey awoodaan:

- iney hantaatacaan
- iney ku jawaabaan qosol iyo af caddeyn
- iney eegaan halka dhawaaqa ka imaanayo

## Ilmaha markey jirsadaan 9 bilood, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan kelmadda "maya" iyo dhowr kelmadoood oo kale
- iney u dhug yeeshaan markey maqlaan magac ay garanayaan

## Ilmaha markey jirsadaan 1 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney ku dhawaaqaan kelmado caadi ah (weysan kareyn mooyee)
- iney muujiyaan waxey u baahan yihiin ama doonayaan iyadoo tilmaamaan ama dhawaaq ah
- iney bilaabaan ciyaar sida markaad tiraahdo qofkaa meeye

## Ilmaha markey jirsadaan 2 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney ku dhawaaqaan xarfaha aan shaqalada aheyn ama dhawaaqoodu sahlan yahay, waxey dhaadhaajiyan kelmado badan
- iney inta badan ku hadlaan kelmado fasiix ah ee la fahmi karo

- iney fahmaan amarrada fudfudud
- iney indhaha ka eegaan qofka la hadlaya
- iney fahmaan illaa 300 kelmadoood, waxeyna oran karaan 1 iyo labo kelmadoood isku xiran
- iney si sax ah ugu jawaaban "haa" ama "maya"

## Ilmaha markey jirsadaan 3 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan amar labo tallaabood ah
- iney fahmaan illaa 900 kelmadoood, waxeyna si fasiix ah u oran karaan illaa 200 kelmadoood
- iney yiraahdaan hadallo gaab gaaban sida (ma sameynayo, ma doonayo) waxey isticmaalaan kelmado naxwe ah sida (ku, ka, u, la)
- iney isticmaalaan jumlado sahlan ee gaagaaban.
- iney weydiyyaan ama ka jawaabaan su'aala sahlan
- iney isticmaalaan hadallo naxwahoodu yahay waqtii la soo dhaafay iyo waqtii soo socda

## Ilmaha markey jirsadaan 4 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan amar sadex talaabod ka kooban
- iney fahmaan illaa 2,000 oo kelmadoood
- iney isticmaalaan jumlado ka kooban afar illaa lix kelmadoood
- iney isticmaalaan kelmado magac u yaal ah sida (adiga, asaga, aniga)
- iney sheekyeeyaa, lakiin isku daraan runta iyo waxa khayaaliga ah

## Ilmaha markey jirsadaan 5 sano, inta badan waxey awoodaan:

- iney fahmaan illaa 2,800 kelmadoood iyo iney ku hadlaan illaa 2,000 oo kelmadoood
- iney isticmaalaan jumlado adag
- iney sheeko dheer oo run ah sheegaan
- inney isticmaalaan xarfaha aan shaqallada aheyn